**OGAYSIISKA HAB-DHAQAMADA ASTURNAANTA**

OGAYSIISKAN WUXUU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI FIICAN U EEG.

**Yaa Soo Bandhigaya Ogeysiiskan**

OFFOR Med, Inc. d/b/a SmileMD ("SMILEMD"), shaqaalaheeda, iyo xubnaha xoogga shaqada ee ku lug leh bixinta iyo isku dubaridka daryeelka caafimaadka dhamaantood waxay ku xiran yihiin inay raacaan shuruudaha Ogeysiiska Hab-dhaqanka Asturnaanta ("Ogaysiiska"). SMILEMD waxay wadaagi doontaa PHI daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka sida ay ogol yihiin HIPAA iyo Ogeysiiskan.

**Waajibaadka Asturnaanta**

SMILEMD waxaa uu uga baahan yahay sharciga iney ilaaliso sir ahaanshaha macluumaadkaaga caafimaad ("Xogta Caafimaadka ee Dhawrsan" ama "PHI") iyo iney ku siiso ogaysiiskan waajibaadka sharciga ah iyo hab-dhaqamada asturnaanta ee laxiriira Macluumaadkaaga Caafimaadka ee La Ilaaliyo. SMILEMD waxay isticmaashaa habab kombuyuutar ah oo laga yaabo inay khasab ku noqoto in Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Dhawrsan si elektaroonig ah loogu shaaciyo sababo ah ujeedooyinka daaweynta, lacag bixinta iyo/ama hawlaha daryeelka caafimaadka sida hoos lagu sharaxay. Marka SMILEMD isticmaasho ama ay shaaciso Macluumaadkaaga Caafimaadka Dhawrsan, waxa nalooga baahan yahay in aan u hogaansano shuruudaha Ogeysiiskan (ama ogeysiis kale oo dhaqangal ah wakhtiga isticmaalka ama shaacinta).

**Ogeysiisyada**

SMILEMD waxaa uu uga baahan yahay sharciga iney ilaaliso asturnaanta macluumaadkaaga caafimaadka, uu kuu qaybiyo Ogeysiiska Hab-dhaqanka Asturnaanta, iyo raacida shuruudaha Ogeysiiskan. SMILEMD ayaa sidoo kale looga baahan yahay iney ku ogeysiiso haddii uu jiro jebin ama gelitaan aan la oggolayn, isticmaalka ama bixinta macluumaadkaaga caafimaad.

**Isticmaalka iyo Shaacinta La Ogolyahay Iyadoona La Heysan Ogolaanshahaada Oo Qoran**

Xaaladaha qaarkood, oggolaanshahaaga qoran waa in la helaa si loo isticmaalo iyo/ama loo shaaciyo PHI-gaaga. Si kastaba ha ahaatee, SMILEMD ugama baahna nooc kasta oo oggolaansho kaaga ah isticmaalka iyo bandhigyada soo socda:

**Isticmaalka iyo Shaacinta sababo Daawayn, Lacag-bixin iyo Hawlaha Daryeelka Caafimaadka ah.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo oo lagu siidaayo si laguugu daweeyo, lagu helo lacag-bixinta adeegyada lagugu siiyay oo aad qabato "hawlaha daryeelka caafimaadka" sida hoos ku faah faahsan:

**Daaweynta.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa oona loo shaaciyo si laguugu siiyo daawaynta iyo adeegyada kale - tusaale ahaan, si loo ogaado loona daweeyo dhaawacaaga ama jirada. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa in laguula soo xiriiro si laguugu siiyo xusuusin ballan ama macluumaad ku saabsan beddelka daawaynta ama faa'iidooyinka iyo adeegyada kale ee caafimaadka la xiriira ee laga yaabo inay dani kuugu jirto adiga. PHI-gaaga waxa kale oo laga yaabaa in loo siidaayo bixiyayaasha kale ee ku lug leh daawayntaada.

**Lacag-bixinta.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo oona la shaaciyo si loo helo lacag bixinta adeegyada lagugu siiyay -- tusaale ahaan, shaacinta si looga dalbado oona lacag looga helo shirkada caymiskaaga caafimaadka, HMO, ama shirkad kale oo habaysa ama bixisa kharashka qaar ama dhammaan kharashka daryeelkaaga caafimaadka ("Bixiyahaaga") ama si loo xaqiijiyo in bixiyahaaga uu bixin doono kharashka daryeelka caafimaadka.

**Hawlaha Daryeelka Caafimaadka.** PHI-gaaga waxa laga yaabaa in loo isticmaalo oo loo shaaciyo hawlaha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan maamulka gudaha iyo qorshaynta iyo hawlo kala duwan oo kor u qaadaya tayada iyo waxtarka qiimaha daryeelka ee lagu siiyay adiga. Tusaale ahaan, PHI waxa loo isticmaali karaa in lagu qiimeeyo tayada iyo kartida dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka. PHI waxaa laga yaabaa in

la shaaciyo si loo xalliyo wixii cabasho ah oo laga yaabo inaad qabto oona loo xaqiijiyo iney kuu sugnaatay booqasho raaxo leh. PHI-gaaga waxa laga yaabaa in la siiyo hay'ado dawladeed ama qolooyinka aqoonsi-bixinta ee kala duwan. Intaa waxaa dheer, PHI waxaa laga yaabaa in lala wadaago la-hawlgalayaasha ganacsiga ee fuliya adeegyada daaweynta, lacag bixinta iyo daryeelka caafimaadka iyagoo ka wakiil ah SMILEMD.

Intaa waxaa dheer, PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo ama loo shaaciyo ujeedada u oggolaanshaha bixiyeyaasha iyo kuwa kale ee xiiseynaya daryeelka caafimaadka, ka raadsada xirfado dhinaca caafimaadka ama doonaya fursad waayo-aragnimo waxbarasho oo ay ku inhdho-indheeyaan, shaqaalaha hoosaadka iyo/ama xubnaha rugta caafimaadka ama la falgala barnaamij caafimaad.

**U Shaacinta Qaraabada, Saaxiibada Dhaw iyo Daryeel-bixiyayaasha kale.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo xubin qoyska ka tirsan, qaraabo kale, saaxiib kuu dhow ama qof kasta oo kale oo aad aqoonsatay oo ku lug leh daryeelkaaga caafimaadka ama kaa caawinaya bixinta kharashka daryeelkaaga.Haddii aadan joogin, ama fursadda aad ku heshiin karto ama aad ku diidan tahay isticmaalka ama siidaynta si macquul ah looma bixin karo sababtoo ah awood la'aantaada ama xaalad degdeg ah, SMILEMD waxa laga yaabaa inay sameyso go'aan xirfadeed si ay u go'aamiso in shaacintu ay dantaada ugu fiican tahay. Haddii macluumaadka loo shaaciyo xubin qoyska ka mid ah, qaraabo kale ama saaxiib gaar ah, SMILEMD waxay daaha ka qaadi doontaa kaliya macluumaadka la rumaysan yahay inay si toos ah u khusayso ku lug lahaanshaha qofka ee daryeelkaaga caafimaad ama lacag bixinta la xidhiidha daryeelkaaga caafimaadka. PHI-gaaga sidoo kale waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo si loo ogeysiiyo (ama uu gacan uga geysto ogeysiinta) dadka noocaas ah goobtaada ama xaaladaada guud.

**Hawlaha Caafimaadka Dadweynaha.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in lagu siidaayo hawlaha soo socda ee caafimaadka dadweynaha: (1) in lagu wargeliyo macluumaadka caafimaadka maamulka caafimaadka dadweynaha ujeeddaduna tahay ka hortagga ama xakamaynta cudurrada, dhaawaca ama naafanimada; (2) in loo sheego xadgudubka iyo dayaca carruurta ee hay'adaha caafimaadka dadweynaha ama mas'uuliyiinta kale ee dawladda ee sharcigu u oggol yahay inay helaan warbixinnadaas; (3) si ay uga warbixiyaan macluumaadka ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada hoos yimaada Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka; (4) in loo sheego qof laga yaabo inuu ku dhacay cudur la kala qaado ama haddii kale uu halis ugu jiro inuu qaado ama faafiyo cudur ama xaalad; iyo (5) inaad uga warbixiso macluumaadka loo-shaqeeyahaaga sida looga baahan yahay sharciyada ka hadlaya cudurrada shaqada la xiriira iyo dhaawacyada ama la socodka caafimaadka goobta shaqada.

**Dhibanayaasha Xadgudubka, Dayaca ama rabshadaha qoyska.** PHI-gaaga waxa laga yaabaa in loo shaaciyo hay'ad dawladeed, oo ay ku jirto adeega bulshada ama wakaalada adeegyada ilaalinta, oo uu sharcigu u fasaxay in ay helaan warbixinada xadgudubka, dayaca, ama rabshadaha qoyska haddii ay jirto aaminaad macquul ah oo ah inaad tahay dhibane xadgudub, dayac ama rabshadaha qoyska.

**Hawlaha Kormeerka Caafimaadka**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo wakaalad kormeer caafimaad oo loo xilsaaray mas'uuliyadda hubinta u hoggaansanaanta shuruucda barnaamijyada caafimaadka dowladda sida Medicare ama Medicaid.

**Dacwadaha Garsoorka iyo kuwa Maamulka**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in la shaacyo inta ay socoto dacwad garsoor ama maamul iyadoo laga jawaabayo amar sharci ama hab kale oo sharci ah.

**Saraakiisha Sharci Fulinta**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo sheego boliiska ama saraakiisha kale ee fulinta sharciga sida loogu baahan yahay ama uu ogol yahay sharciga ama iyadoo la raacayo amar maxkamadeed ama xeerbeegti weyn ama amar maamul. Tusaale ahaan, PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in la siidaayo si loo aqoonsado ama loo helo tuhmane, qof baxsad ah, marqaati macluumaad haya, ama qof maqan ama si loogu sheego dembi ama fal dambiyeed xarunta.

**Xarunta Asluubta**. PHI waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo xarunta asluubta haddii aad tahay maxbuus ku jira xarunta asluubta iyo haddii xarunta asluubta ama hay'adaha fulinta sharciga ay noo soo gudbiyaan codsiyo gaar ah.

**Soo Iibsiga Xubnaha iyo Unugyada**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo bandhigo ururada fududeeya soo iibinta xubnaha, isha ama unugyada, bangiyada ama beerista.

**Cilmi-baarista**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in la isticmaalo ama la shaaciyo iyadoo la adeegsanayo ogolaanshahaaga ama ogolaanshahaaga la'aanteed haddii Guddiga Dib-u-eegista Hay'aduhu uu oggolaado ka-dhaafitaanka oggolaanshaha shaacinta.

**Caafimaadka ama Badbaadada**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo ama loo shaaciyo si looga hortago ama loo yareeyo khatar halis ah oo ku wajahan caafimaadka ama badbaadada qof ama dadweynaha.

**Militariga Mareykanka.** PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo ama loo shaaciyoTaliyayaasha Militariga Mareykanka si loo xaqiijiyo fulinta saxda ah ee howlgalka militariga. Maamulka taliska millatariga ee helaya macluumaadka caafimaadka ma laha hay'ado hoos yimaada Xeerka Asturnaanta ee HIPAA, laakiin waxay hoos yimaadaan Sharciga Asturnaanta ee 1974 iyo DoD 5400.11-R, "Barnaamijka Asturnaanta DoD," Maayo 14, 2007.

**Hawlaha Dawladeed ee Kale ee Gaarka ah**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo qeybo ka tirsan dowladda oo leh shaqooyin gaar ah, sida Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka xaaladaha qaarkood tusaale ahaan Adeegga Qarsoodiga ama NSA si loo ilaaliyo dalka ama Madaxweynaha.

**Magdhawga Shaqaalaha**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo sida lagu oggolaaday iyo ilaa xadka lagama maarmaanka u ah u hoggaansanaanta sharciga gobolka ee la xiriira magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la midka ah.

**Sida uu Ugu baahan yahay Sharciga**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in la isticmaalo oo la shaaciyo marka uu sidaas u baahdo sharci kale oo aan horay loogu xusin qaybaha hore; sida ay u baahan tahay FDA, si ay ula socoto badbaadada qalabka caafimaadka.

**Xasuusinada Ballamaha**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo in lagugu sheego ama lagugu xasuusiyo ballamahaaga.

**Lacag soo uruurinta**. PHI-gaaga waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo in laguula soo xiriiro iyada oo qayb ka ah dadaallada lacag soo ururinta, haddii aysan ahayn in aad doorato inaadan helin macluumaadkan oo kale mooyaane.

**ISTICMAALKA IYO SHAACINTA U BAAHAN OGGOLAANSHAHAADA OO QORAN**

**Isticmaal ama Shaacinta Oggolaanshahaaga La Heysto**. Ujeedo kasta oo aan ahayn kuwa kor lagu sifeeyay, PHI-gaaga waxa la isticmaali karaa ama la shaacin karaa marka aad ku bixiso oggolaanshahaaga qoran gudaha foomka oggolaanshaha ("Oggolaanshahaaga"). Tusaale ahaan, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka oggolaanshaha ka hor inta aan PHI-gaaga loo diri karin shirkaddaada caymiska nolosha ama qareenka matalaya dhinaca kale ee dacwadda aad ku lug leedahay.

**Suuq-geynta.** Oggolaanshahaaga qoran ("Oggolaanshahaaga Suuqgeynta") waa in la helaa ka hor inta aan la isticmaalin PHI-gaaga si laguugu soo diro agab suuqgeyn ah. Si kastaba ha ahaatee, SMILEMD waxa laga yaabaa in uu kula soo xidhiidho wax yaabaha ku saabsan badeecooyinka ama adeegyada la xidhiidha daawayntaada, maamulka kiiska ama isuduwidda daryeelka, ama daawaynta kale, daabiibitaanada, bixiyayaasha ama goobaha daryeelka iyada oo aan la helin Oggolaanshahaaga Suuqgeynta. Intaa waxaa dheer, SMILEMD waxa ay kuu soo diri kartaa isgaarsiinta ku saabsan daawaynta, ilaa aad dooratid inaadan helin isgaarsiin noocaan ah, kaas oo SMILEMD ay ku heli karto gunno dhaqaale.

**Iibinta PHI-ka**. SMILEMD ma shaacin doonto PHI-gaaga la'aanta oggolaanshahaaga taasoo lagu beddelayo lacag-bixin toos ah ama aan toos ahayn marka laga reebo xaalado xaddidan oo sharcigu oggol yahay. Duruufahaas waxaa ka mid

ah hawlaha caafimaadka dadweynaha; cilmi-baaris; daaweynta qofka; iibinta, wareejinta, isku darka ama isku dhafka SMILEMD; adeegyada ay bixiyaan shuraakada ganacsiga, iyadoo la raacayo heshiiska iskaashiga ganacsiga; siinta shakhsiga koobiga PHI-kooda; iyo ujeedooyinka kale ee loo arko inay lagama maarmaan tahay oo ku haboon Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka (Health and Human Services, HHS).

**Isticmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga Aad Qarsoodiga u ah**. Intaa waxaa dheer, sharciga federaalka iyo gobolka ayaa ugu baahan dhawrid gaar ah kuwaas oo khaas ah oo loogu talagalay macluumaad aad u qarsoodi ah oo gaar ah oo adiga kugu saabsan ("Macluumaadka Aadka Qarsoodiga u ah"), oo ay ku jiraan qayb-hoosaadkaada PHI-ga ee (1) lagu hayo qoraallada daaweynta dhimirka; (2) ku saabsan xanuunka dhimirka, dib u dhac maskaxeed iyo itaaldarrida korriinka; (3) ku saabsan khamriga ama si xun u isticmaalka maandooriyaha ama qabatinka; (4) ku saabsan baaritaanka, ogaanshaha ama daaweynta HIV/AIDS; (5) ku saabsan cudurka(rada) la kala qaado, oo ay ku jiraan cudurada xubinta taranka; (6) ku saabsan baaritaanka hidda-socodka; (7) ku saabsan xadgudubka iyo dayaca carruurta; (8) ku saabsan xadgudubka ee ka dhex dhaca qoyska ee uu ku dhaqaaqay qof weyn; ama (9) ku saabsan tahay xadgudubka xagga galmada. Si macluumaadkaaga sirta ah loo shaaciyo ujeeddo aan ahayn kuwa sharcigu ogol yahay, oggolaanshahaaga qoran ayaa loo baahan yahay.

**XUQUUQDAADA KU SAABSAN MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE DHAWRSAN**

**<u>Xaqa aad u leedahay inaad Codsato Xayiraado Dheeraad ah</u>.** Waxaad codsan kartaa xannibaado ku aadan isticmaalka iyo shaacinta PHI-gaaga (1) ee loogu talagalay daawaynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, (2) siinta shakhsiyaadka (sida xubin qoyska, qaraabo kale, saaxiib dhow ama qof kasta oo kale oo aad aqoonsatay) ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixinta la xidhiidha daryeelkaaga, ama (3) in lagu ogeysiiyo ama uu gacan ka geysto ogaysiinta shakhsiyaadka noocaas ah waxa saabsan goobta aad joogto iyo xaaladaada guud. Iyadoo dhammaan codsiyada xayiraadaha dheeraadka ah si taxadar leh loo tixgalin doono, SMILEMD loogama baahna inuu ogolaado xayiraadaha la codsaday.

Waxa kale oo aad codsan kartaa in lagu xaddido siidaynta PHI-gaaga qorshahaaga caafimaad ee lacag-bixinta iyo ujeedooyinka hawlaha daryeelka caafimaadka (oo aan ahayn daawaynta) haddii siidaynta ay khusayso shay ama adeeg daryeel caafimaad oo aad jeebkaaga uga bixisay kharashka si buuxda.
Haddii aad rabto inaad codsato xannibaado dheeraad ah, fadlan la xidhiidh Sarkaalka Madax U Hoggaansanaanta. Jawaab qoraal ah ayaa laguu soo diri doonaa.

**<u>Xaqa ku aadan Helida Isgaarsiin Qarsoodi ah</u>.** Waxa aad codsan kartaa, SMILEMD-na waxa ay ku qaabili doontaa, codsi kasta oo qoraal ah oo macquul ah oo ku saabsan in aad ku hesho PHI-gaaga hab kale oo isgaarsiineed ama meelo kale.

**<u>Xaqa aad u leedahay In aad Ka noqoto Oggolaanshahaaga</u>.** Waxaad ka noqon kartaa ogolaansho kasta oo qoraal ah oo lagu helo PHI-gaaga, marka laga reebo ilaa xad in SMILEMD ay qaaday tillaabo taasoo ay ku tiirsaneed PHI-kaas, adiga oo gaadhsiinaya bayaan ka noqosho qoraal ah Sarkaalka Madaxa U Hoggaansanaanta sida hoos lagu tilmaamay.

**<u>Xaqa aad u leedahay In Aad Indho-indheyso oona Hesho Nuqul ka mid ah Macluumaadkaaga Caafimaadka</u>.** Waxaad codsan kartaa marin u helka faylkaaga diiwaanka caafimaadka iyo diiwaannada biilasha ee ay hayso OFFOR Health dba SMILEMD si aad u baadho oo aad u codsato koobiyada diiwaanka. Xaalado xaddidan, waxaa laga yaabaa in laguu diido inaad gasho qayb ka mid ah diiwaannadaada. Haddii aad rabto inaad gasho diiwaanadaada, fadlan la xidhiidh Biil-gareynta ama Diiwaanada Caafimaadka 877-789-8583. Haddii aad codsato koobiyada diiwaanka oo waraaqo ah, waxaa laga yaabaa in lagugu dalaco si waafaqsan sharciga federaalka iyo gobolka. Ilaa xadka codsiga diiwaanadu ay ku jiraan qaybo ka mid ah diiwaanada aan ku jirin qaab warqad ah (tusaale, filimada raajada), waxaa lagugu soo dalacayaa kharashka macquulka ah ee nuqullada. Sidoo kale waxaa lagugu soo dalacayaa kharashka boostada, haddii aad codsato in nuqullada laguugu soo diro boostada. Si kastaba ha ahaatee, wax lacag ah laguguma

dallaci doono koobiyada la codsado si loo sameeyo ama loo buuxiyo codsiga barnaamijka dheefaha naafada ee dawlada dhexe ama gobolka.

**Xaqa aad u leedahay inaad wax ka beddesho diiwaankaaga.** Waxaad xaq u leedahay inaad codsato inaan wax ka bedelno ama saxno macluumaadkaaga caafimaad oo aad aaminsan tahay inay khaldan yihiin ama aanay dhammaystirnayn. Tusaale ahaan, haddii taariikhda dhalashadaadu khaldan tahay, waxaad codsan kartaa in macluumaadka la saxo. Si aad u codsato sixid ama wax ka bedel xogtaada caafimaad, waa in aad codsigaaga ku samaysaa qoraal oo aadna bixisaa sababta codsigaaga. Waxa aad xaq u leedahay in aad codsato wax ka beddelka ilaa inta macluumaadka anaga aanu hayno ama annaga naloo hayo. Xaalado gaar ah ayaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga. Haddii codsigaaga la diido, waxaanu ku siin doonaa macluumaadka ku saabsan diidmadayada iyo sida aad nooga xareysan karto bayaan qoraal ah oo khilaafitaan ah kaas oo noqon doona qayb ka mid ah diiwaanka caafimaadkaaga.

**Xaqa aad u leedahay Helida Xisaabta Shaacinta.** Markaad codsato, waxaad heli kartaa xisaabinta shaacinta qaarkood ee PHI-gaaga oo la sameeyay wakhti kasta oo ka horreeya taariikhda codsigaaga, muddadaas oo aan ka badnayn lix sano.

**Xaqqa aad u leedahay in aad Hesho Nuqul Ka mid ah Ogeysiiskan.** Markaad codsato, waxaad heli kartaa nuqul warqad ah oo Ogeysiiskan ah, xitaa haddii aad ogolaatay inaad si elektaroonik ah ku hesho ogaysiiskan.

**Wixii Macluumaad Dheeraad ah ama Cabashooyin.** Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga khaaska ah, aad ka walaacsan tahay in xuquuqdaada khaaska ah lagu xadgudbay ama aadan ku raacsanayn go'aanka laga gaadhay marin u helka PHI-gaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa Sarkaalka Madaxa Caafimaadka, Sarkaalka U Hogaansanaanta, ama Sarkaalka Arrimaha Asturnaanta. Waxa kale oo aad cabasho qoraal ah u gudbin kartaa Agaasimaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka.

Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah
Xafiiska Barnaamijyada Cadaalada
Waaxda Caddaaladda ee Maraykanka
999 N. Capitol Street, NE
Washington, DC 20531

SMILEMD kuguma aargoosan doono haddii aad cabasho u gudbiso Xafiiska u hoggaansanaanta Amniga iyo Qarsoodiga ama Agaasimaha.

**Taariikhda Dhaqangalka ah iyo Muddada Ogeysiiskan**

Taariikhda Dhaqangalka ah. Ogeysiiskani wuxuu dhaqan galayaa Luulyo 1, 2022.

Xaqa aad u leedahay in aad Wax ka bedesho Shuruudaha Ogeysiiskan. Shuruudaha Ogeysiiskan waa la bedeli karaa wakhti kasta. Haddii Ogeysiiskan la beddelo, shuruudaha ogaysiiska cusub waxa laga yaabaa in laga dhigo kuwo wax ku ool u ah dhammaan PHI ee ay SMILEMD hayso, oo ay ku jiraan macluumaad kasta oo la sameeyay ama la helay ka hor inta aan la soo saarin ogaysiiska cusub. Haddii Ogeysiiskan la beddelo, ogaysiiska cusub waxaa lagu boosti-gareyn doonaa boggayaga internetka. Waxa kale oo aad ka heli kartaa ogeysiis kasta oo cusub adiga oo kala xidhiidha Sarkaalka Madaxa Caafimaadka macluumaadka xidhiidhka ee hoose.

**MEELAHA LAGALA SOO XIDHIIDHI KARO SMILEMD:**

SMILEMD
Fiiro gaar ah: Sarkaalka Madaxa Caafimaadka
118 Graceland Blvd. PMB 324
Columbus, OH 43214
Iimaylka: Compliance@offorhealth.com